

Guudmarka Habka Racfaanka

Habka Racfaanka waxaa loogu talagalay dadka degan Dugsiyada Dadweynaha Portland oo keliya.

- Qoysaska deggan meel ka baxsan xuduudaha PPS waa inay adeegsadaan [Nidaamka Bakhtiyaa-nasiibka ee Degmooyinka Dhexdooda](#), oo furmaysa Meey kasta.

Guud ahaan, ardayda ku cusub PPS waxa laga filayaa inay iska diwaan galiyaan dugsiyada xaafadooda, oo uma baahna inay buuxiyaan codsiyada beddelka. Qoysaska PPS waxay isticmaalaan nidaamka codsiga dhibka si ay u codsadaan in laga bedelo dugsi hadda/lagu meeleeyo dugsi iyo dugsi kale oo ka mid dugsiyada deriska:

Codsiyada waa la heli karaa sanadka oo dhan.

- Bedelaadda ka dib marka sanad-dugsiyeedku bilaabmo waxay yihiin kuwa xadidan. Qoysaska waa inay la kulmaan kooxda dugsigooda kuwaasi oo iyaga oo ka wakiil ah gudbin doona codsiyadooda.
- Si aad u hesho fursada meelaynta ugu fiican ee sanad dugsiyeedka soo socda, codso inta lagu jiro wareegtada wareejinta sanadlaha ah. Taariikhaha waxaa lagu dhajiyay bogga macluumaadka bakhtiyaanasiibka iyo wareejinta ([Lottery and Transfer Information Page](#)).

Nidaamka racfaanka waa fursad lagu xallinayo dhibaataada: Qoysasku waxay sharxaan sababta baahida ilmahooda looga dabooli waayay dugsi xaafadda ama dugsi hadda jira ee PPS iyo sida u wareejinta dugsi kale ay u hagaajin lahayd xaaladda.

- Sababaha caadiga ah ee bedelka loo rabo waxaa ka mid ah daryeelka caruurta, khatar jireed ee ilmaha dugsi, iyo tixgalinta walaalaha. Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay tixgalin doonaan sabab kasta oo lagu bedelo. Waxaad fiirisaa [liistada sababaha bedelaka adiga oo raacaya tallaabooyinkan](#).
- Shaqaalaha Xarunta Diiwaangelinta iyo Bedelka waxay ra'yi ka raadsan doonaan xaafadda/dugsi hadda ardaygu deggan yahay oo ku saabsan in dugsi wax ka qaban karo welwelka qoyska iyo inuu dabooli karo baahida ilmaha.

Codsiyada wareejinta waxaa loo habeeyaa habka lagu helo.

- Go'aannada codsiyada la helo inta lagu jiro wareejinta bakhtiyaanasiibka waxaa la gaari doona ku dhawaad lix usbuuc ila siddeed usbuuc ka dib wareegga wareejinta.
- Iyada oo la raacayo xilliga bedelka, go'aamadu waxay guud ahaan qaataan inta u dhaxaysa hal ilaa saddex todobaad, iyada oo ay ku xidhan tahay culeyska arajida codsiga.
- Ilmuhua waa inuu sii wataa inuu dhigto dugsi hadda/lagu qoray inta codsiga beddelka la tixgeliyo.

Natiijooyinka Racfaanka

- Agaasimaha Xarunta Diiwaangelinta & Wareejinta ee PPS ayaa ogoladaa ama diidaa codsi kasta.
- Rafcaanka waxaa la oggolaadaa marka la xaqiijiyo caddaynta in caafimaadka, badbaadada ama horumarka waxbarashada ardayga si fiican loogu adeegi karo dugsi kale, iyo marka boos laga helo dugsiyaas.
- Beddelka la oggolaaday waxay dhaqan galayaan ilaa fasalka ugu sarreeya ee dugsi ama barnaamijka la ansixiyay. Gaadiidka guud ahaan waxa ay ahaan doontaa mas'uuliyadda qoyska.
- Gaadiidka dugsi loo raacaya guud ahaan waxaa ka mas'uul ah qoyska ardayga.
- Haddii boos laga waayo mid ka mid ah dugsiyada la codsaday, shaqaalaha ETC waxa laga yaabaa inay soo jeediyaan dugsiyo kale oo beddelka meel boos looga helayo.
- Haddii wareejinta aan la oggolaan, qoysku waxay rafcaan ka qaadan karaan iyagoo soo gudbinaya warqad macluumaad dheeraad ah ama dukumeenti ah.
 - Kormeerayaasha Xafiiska Waxqabadka Dugsi ayaa dib u eegis ku sameeya macluumaadka iyo qaadista waraysiyada marba sida loogu baahdo ka hor intaysan soo saarin go'aanka kama dambaysta ah.